**SUM: XXIG/AG0094/2025** **TR: 07/08/2025**

**Ku: Dhamaan Ku-xigeenadda Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka**

**Og: Maxkamadaha Degmooyinka Gobolka Banaadir**

**Og: Maxkamadda Gobolka Banaadir**

**Og: Maxkamadda Racfaanka Gobolka Banaadir**

**Og; Maxkamadda Sare ee Dalka**

**UJEEDDO: Dib u habaynta kala Qeybinta Xeer Ilaaliyayaasha ee la xiriirta heerarka Maxkamadaha dalka;**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya: -**

**Markii uu arkay:** Qodobka 12aad, 69aad, 70aad iyo 71aad ee Xeer Lr: 01, soona baxay 01/07/1963, ee Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliya.

**Markii uu arkay:** Qodobka 8aad ee Xeer Lr: 03, soona baxay 12/06/1962, ee Xeerka Nidaamka Garsoorka Soomaaliya.

Markii uu tixgaliyay: Baahida loo qabo in dib loo habeeyo howlaha iyo shaqooyinka Xeer Ilaaliyayaasha ee Xafiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka;.

**Markii uu garwaaqsadey:** In ay muhiim tahay in Xeer Ilaaliye walba oo xafiiska ka mid ah uu xil gooni ah iska saaro hawlaha uu u xilsaaran yahay, sida ka hortagga iyo ka daba-tagga dambiyada, ka qeyb galka dacwadaha, uuna dowr ku yeesho wacyigalinta iyo hanashada kalsoonida bulshada;

**Markii uu arkay:** In in ay lagama maarmaan tahay in matalaadda iyo ka qeyb galka dacwadaha Xeer Ilaaliyayaasha ee Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka lagu jaan gooyo heerarka kala duwan ee Maxkamadaha dalka;

**Wuxuu soo saaray**

## Qodobka 1aad

Shaxda hoose oo tilmaamaysa qeybinta Xeer Ilaaliyayaasha Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ee la xiriirta ka qeyb-galka dacwadaha Maxkamadaha Dalka

| Lr | Magaca Maxkamadda | Qeybinta Xeer Ilaaliyayaasha |
|---|---|---|
| 01 | Maxkamadda Sare ee Dalka iyo Maxkamadda Racfaanka Gobolka Banaadir | - Farxaan Xuseen Maxamed,<br>- Jamaal Maxamed Axmed<br>- Cabdullaahi Yuusuf Aadan,<br>- Jibriil Jirde Cabdi,<br>- Faarax Cabdiraxmaan Jaamac,<br>- Maxamed Maxamuud Cali<br>- Mustaf Macalin Cali,<br>- Cabdirashiid Ismaaciil Nuur,<br>- Xafsa Sulaymaan Cusmaan<br>- Maxamed Cusman Maxamuud<br>- Cabdirisaaq Maxamed Ismaacil |
| 02 | Maxkamadda Gobolka Banaadir | Xeer Ilaaliye Walba oo loo igmaday |
| 03 | Maxkamadaha Degmooyinka Gobolka banaadir ee Qeybta Bartamaha, | Sulayman Maxamed Maxamuud iyo Cabdullaahi Cali Cumar |
| 04 | Maxkamadaha Degmooyinka Gobolka banaadir ee Qeybta Waliyow Cade, | C/salaam Maxamed Axmed iyo Cabdulqaadir Cumar Maxamed |
| 05 | Maxkamadaha Degmooyinka Gobolka banaadir ee Qeybta Bari, | Max'ed Cabdulle Maalin iyo Maxamed Cabdirisaaq Nuux |
| 06 | Maxkamadaha Degmooyinka Gobolka banaadir ee Qeybta Galbeed, | Cabdicasiis Xaji Maxamed iyo Cali Cabdikariim Axmed. |

**Qodobka 2aad**

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranku waxa uu farayaa dhammaan Ku-xigeenadda Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka in xil gooni ah iska saaraan hawlaha loo igmaday, sida ka hortagga iyo ka daba-tagga dambiyada, ka qeyb galka dacwadaha, iyadda oo Xeer Ilaaliye walba uu qaadanayo dowrkiisa wakiilnimo.

**Qodobka 3aad**

**Dib u habaynta kala Qeybinta Xeer Ilaaliyayaasha,** waxa ay dhaqan galaysaa marka uu saxiixo Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka.

Mahadsanid

ALLAA MAHAD LEH

**Sulaymaan Maxamed Maxamuud**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**